

Miisaaniyadda 2024: Qorshe mas'uul ka ah koritaanka gobolka

Febraayo 29, 2024

Dowladda Alberta waxay sii deysay Miisaaniyadda 2024 - qorshe maaliyadeed oo taxaddar leh si loo xoojiyo daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada, loo dhiso bulshooyin ammaan ah laguna taageero gobol sii koraya.

Miisaaniyadda 2024-ka waxa ay soo bandhigaysaa saddex sano oo kale oo miisaaniyad dheeli tiran – kharash aan ka badnayn inta ay dawladdu yeelan doonto.

Waxayna marka hore diiradda saaraysaa kharashka ku baxa qoysaska Alberta, iyada oo maalgelinaysa caafimaadkooda, waxbarashadooda, badbaadadooda, iyo kobaca dhaqaalaha iyo guusha. Maalgelinta mudnaanta leh waxaa ka mid ah:

- **Taageerada caafimadka iyo caafimaadka dhimirka:** \$26.2 bilyan oo doolarka hawlgalka ah, oo ah 4.4 boqolkiiba korodhka saadaasha 2023-24.
- **Taageerada waxbarashad:** \$9.3 bilyan oo kharashyada hawlgalka ah, koror 4.4 boqolkiiba ah.
- **Taageerada bulshada:** \$2.9 bilyan 2024-25 oo la siiyo dadka reer Alberta iyada oo loo marayo Dakhliga la hubiyay ee barnaamijka Naafada daran, Alberta Seniors Benefit iyo barnaamijyada kale ee taageerada bulshada, oo lagu daray \$355 milyan Alberta Lacag bixinta Faa'iidada Ilmaha iyo Qoyska.
- **Kaalmada shaqaalaha:** Kordhinta \$102 milyan muddo saddex sano ah si loogu daro 3,200 kuraas fasalka tababarka ah iyo sidoo kale \$62.4 milyan si loo ballaariyo waxbarashada dhakhtarka.
- **Kaalmada badqabka bulshada:** \$1.2 bilyan oo loogu talagalay Badbaadada Dadweynaha iyo Adeegyada Degdegga ah si ay u taageeraan booliiska iyo kooxaha dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka iyo in la geeyo booliiska heerka-waddo.
- **Kaabayaasha (dugsiyada, wadooyinka, isbitaalada):** Wadar ahaan, \$25 bilyan muddo saddex sano ah oo maalgelin raasamaal ah lagu dhisayo dugsiyo, isbitaal, wadooyin iyo kaabayaasha kale, taageeraya 24,000 shaqo toos ah iyo 13,000 shaqo aan toos ahayn oo gobolka oo dhan ah.

Gobolku wuxuu kaloo badbaadin doonaa in ka badan \$3 bilyan Sanduuqa Badbaadinta Dhaxalka Alberta, isagoo kordhinaya qiimaha Sanduuqa qiyaastii \$25 bilyan.

2024-25, wadarta dakhliga waxa lagu qiyaasayaa in uu yahay \$73.5 bilyan iyo wadarta kharashku waa \$73.2 bilyan.

Su'aalaha warbaahinta

Savannah Johannsen

savannah.johannsen@gov.ab.ca

780-686-3521

Xoghayaha Warfaafinta, Guddiga Khasnajiga iyo Maaliyadda